# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:37 AM** **Hansard No.22/1** **Kal-fadhiga 222[aad]**

**Fadhigii 1[aad]** ***19/08/2013***

**Dooda Ajendaha Kal-fadhiga 22[aad] oo Socotey Maalin kaliya kana qeyb qaateen 18 mudane.**

1. **Cali Maxamed Aadan:-**

**Waxaan ajendaha u deynayaa**

- **Xeerka Booliiska** waxaad moodaa inuu inagu soo noqnoqdey Xeerkaa Isaga sidiisa ayaan U deynayaa inuu ugu jiro ajendaha

- **Laba xeer ee Madaxweynaha** ka so noqdey iyana waan u daaya oo Golaha ayaan Go'aan ka qaadan doono.

- **Xeerka Shidaalka iyo Macdanta** Magac Xeerka ayaan Saxayaa oo waa in laga dhigaa sida Magaca Wasaaradu yahay ee ah Xeerka Macdanta iyo Tamarta.

**Waxaan ka saarayaa:-**

- **Xeerka Hay'adda Dib-u habeynta Shuruucda** isaga waan ka saarayaa oo Qeyru dastuuri, waxaa dibu u eegista iyo dib-u haybeynta shuruucda awood u leh baarlamaanka oo qaabilsan habeyntisa iyo Hubinta in lagu shaqeeyay oo ku shaqo leh sida Dastuurka Qodobkiisa , Xukuumaduna Qaryaqaan Guud bay leedahay oo Golaha u qaabilsan, Markaa hay'ad Shuruuc oo aan 3 Gole Qaran ahayn waa Qeyru dastuuri.

- **Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada** isaga waxbaa ka horeeya ilaa la helo 4 qodob lama sameyn karo kuwaas oo kala ah.

- ✓ Xeerkii diiwaangalinta lama hayo oo isaga doorashada lagu qaban lahaa
- ✓ Diiwaangalinta laftigeedii oo lagu saleyn lahaa tirade Codbixiyaasha Saamiga isna lama hayo ama lama sameyn tirokoob dalka oo dhan laga qabtay.
- ✓ Qiimeynta Gobolada Cusub iyo kala xadeynta, Gobolo cusub baa la sameeyay sanad walba in 7dii Gobol ee cusbaa sanad walba inay la yidhaahdo waxba lagu saleyn mayo xaq uma laha, inay magac uun ahaato yeelina meyno. Xukuumadu waa inay qiimeyaan Gobolada Cusub oo Gobolka qaadi karana laga qabto, Markaa Xadaan Xeerka kala Xadeynta xukuumadu sameyn doorasho iyo Xeer Doorasho Golaha Wakiilada lama sameyn karo, Ajendahana ha laga saaro.
- ✓ In la xaliyo khilaafaadki ka dhashey Doorashadii hore saami qeybsi buu doonayaa.

- o **Xeerka Doorashada Golaha Guurtida** isaga waxaa la yidhi madaxweynuhu ma keenin oo isaga keenaya markaa hadaan wali Madaxweyhinii wali keenin isna ha laga saaro.

**Waxaan ku soo darayaa:-**

- o Hawl-galinta Gudiyada iyo La xisaabtankooda, si Goluhu u shaqeeyo waayo dhaliil badan baa shacabkii ina soo doortey inoo hayaa.
- o Dabagalka Xeerarkii dhaqangalay ee Goluhu ansixiyay Madaxweynuhu ansixiyay in aynu daba galno inay shaqeeyen.
- o Iswaafajinta Xeerarkii Cahdi-qarameedka lagu sameeyay iyo Dastuurka, Xeerar badan baanu sameynay Barigii Cahdi Qarameedka mid Dastuurka waafaqsanina ma jiro.
- o Waxaan intaa ku dari lahaa Gudoomiye Xildhibaanada waxaan u soo jeedinayaa ilaahay ka baqa soona xaadira Golaha, Waad mahadsantihiin.

**2. C/raxman Cismaan Caalim:-**

**Waxaan ku soo darayaa:-**

- o In lagu soo daro Qodobka cusub ee Cali ka Hadley haday tahay **Guddiyadu inay shaqeeyaan iyo Xeerarkii dhaqangalay ee aynaan garanayn meel ay ku dambeeyan iyo Waxyaabo badan oo Mugdi ku**

**jira Golahan Gudihiisa** Qodobka arrimaha Golaha u noqdaan qaar wax ku oola in lagu daro waliba xaga hore la soo mariyo inteynaan xeerarkan galin.

**Waxaan Saxaa laba Qodob ama Arrimood:-**

- Xeerka Hay'adda Dib- u eegista Shuruucda, Xeerkani wuxuu khuseeyaa Hay'ad Golahani ansixinay oo aynu Budgetka siino oo jirta, laakiin sida magacu siduu u qoranyahay wuu khaldanyahay waa Walaaleynta Xeerarka dalka ee Xeerka Islaamiga, Xeerka Dhaqanka iyo Xeerka Constitutionka ah in la walaaleeyo weeye ee sidaa ha loo saxo.

- Xeerka Doorashooyinka Golaha wakiilaa waa mid loo baahanyahay in la diyaariyo, laakiin in shirgudoonku keeno maaha waa in loo dhiibo Gudidda Shaqada u leh, shirgudoonku xaq uma laha inay keenaan Xeer.

3. **Md. Ibrahim Mahdi Buubaa:-** Shir-gudoonka iyo Mudanayaashuba way salaamanyihiin, Ajendahan waxa

Ajendaha sida uu kala horeynayo waxaan ugu soo horeysiin lahaa

- Xeerka Caasimada oo mudo golaha horyaalay isaga ayaan ugu horeysiinayaa.
- Wasaarada dalka waxay noqonayaan Xeer laga soo saaro ayaan isna soo jeedinayaa Wasaaradaha dalku inay kaambeyn noqdaan maaha oo xukuuumadii timaadaaba Wasiiru dawlayaan aan Dastuurka iyo Shuruucda meelna kaga qorneyn dhaqaalihii Dalka lagu burburiyo maah.
- Daba-galka Xeerarka dalka,

**Waxaan ka saarayaa:-**

- Xeerka Komishanka Dib- u habeynta Shuruucda oo ah mid sharci-daro ah oo aan loo baahnayn.
- Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada ilaa la helo Diiwaangalin, Kala-xadeynta Gobolada Dalka, **markaa waxaan soo jeedin lahaa** laba qodob oo Go'aan Gole ah inaan Sameyno oo kala ah:-

  - In la dardargaliyo dhamaan asbaabta suurta galineysa doorashooyinka dalka iyo inay sida uga haboon u dhacaan.

- In la magacaabo Gudidii Kala-xadeynta Gobolada dalka oo si doorashada dalka uga dhacdo iyana Kala-xadeyntii la helaa.

4. **Mp. Bashiir Tukaale:-** Anigu Ajendahan Gabigiisaba intaan duuduubo ayaan tuurayaa, **waxaan Soo jeedinayaa oo kaliya:-**
   - Xaalada Guud ee dalka uun ha lagu soo kobo anjendahan

5. **Md. Ibrahim Axmed Haybe:-**

   **Ajendaha waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo:-**
   - Qodobka 1aad arrimaha Golaha ayaan ka dhigayaa arrimaha Golahan aynu muhiimada 1aad siino
   - Qodobka 2aad Xeerka Casimada
   - Qodobka 3aad Xeerka Booliiska
   - Qodobka 4aad Xeerarka Madaxweynaha ka soo noqdey

   - **Xeerka Doorashooyinka** waxaan la qabaa Md. Calibarre oo wax badan Baa ka horeeya, Diiwaangalintiii in la sameeyo sidaa awgeed Xeerka Doorashooyinka meesha waan ka saarayaa.

   - Qodobka 5aad waxaan ka dhigayaa Miisaaniyada Golaha.

6. **Md. Maxamed Faarax Qabile:-** waxaan qabaa anigu in
   - Qiimeynta Dalka waxaa saldhig u ah Qiimeynta Toosinta Xaalada Golahan wakiilada, cida manta qiimeynta u baahan waa Golahan sharci-dejinta oo kaalintii ku beegnayd gabey, waa inaynu galnaa fadhiyo xidhan oo aynu ku toosinayno.

     Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa inaynaan dhaliisha Maanta Golaheena taal yaynaan dhaafin ee aynu ugu horeysiino .

7. **Md. Axmed Maxamed Diiriye:-**
   - Xeerka doorashooyinka doorashooyinka golaha haloogu horaysiiyo dhaliilaha aynu leenahay marka aynu xeerka keeno ayaa ina gudeysa, waa inaynu sameynaa Xeerkii la inagu soo dooranayay.

   - Xeerka caasimadana halagu xigsiiyo.

**8. Md. Maxamed Cisman bulqaad:- waxaan ajendaha ka dhigi lahaa:-**

- Qiimaynta xaalada guud ee dalka haloogu horaysiiyo ayaan soo jeedinlahaa
- Qiimaynta xaalada guud ee Golaha Wakiilada
- Xakamaynta xukuumada oo waliba Madaxweynaha loo yeedho oo Golaha Su'aalo laga weydiiyo ayaan soo jeedinayaa.
- Waa in uu xildhibaankua awoodiisa uu helaa xukuumadu dhageysataa, manta Golihii dhamaa ee Shacabka matalayay Xukuumadii ma dhageysanayso.

**9. Md. Baar Siciid faarax:- Waxaan soo jeedinlahaa:-**

- in laga saaro haayada dib u eegista shuruucda oo lacagta hay'adan lagu sameynayo Caruurtan shaqo la'aanta u tahriibayaa shaqo ha loogu sameeyo
- Waxaan kale oo aan ku soo darilahaa Xeerka diwaan-galinta.
- Kala-xadaynta goboladuna waa mihiim ee hala sameeyo.
- Waxaa kale oo aan soo jeedinlahaa in gudiyada golaha wax laga qabto oo lakala badalo.

**10. Xasan Cawale Caynaan:- Waxaan ku soo darilaahaa ajandaha:-**

- heshiiskii kadhacay turkiga in halkan laga ansixiyo
- Xeerka caasimada halaga dhigo ka koobaad
- Waan in uu goluhu ay galaan shir gudoohooda oo albaabada u xidhanyahay

**11. Md. Maxamuud Jaamc Cilmi (Dable):-** shir-gudoonka iyo Mudanayaashu way salaamanyihiin, Waxaa nasiibdaro ah Ajadaha la inoo keeno oo aynaan waxba kulahayn oo la yidhaahdo u sacbiya, waaa in ajendaha uu ku jiraa waxa aynu inagu tabanayno.

Waxaa kale oo aan u baahanahay in aynu arimaha gudeheena inaan tvga laga daawado waa inanynu albaaba inaynu xidhano oo wixii dhexdeena ah iyo wixii inoo dan ah aynu fadhi xidhan kaga hadalno markaa waa ajendaha lagu soo daraa..

Cidkasta Xeer ma soo qori karto Xeerka Doorashooyinka Gudidda shaqada ku leh ha loo dhiibo oo shirgudoonka waa lagu khaldaye ha laga daayo. xeerka doorashada golaha wakiilada Xeer Lr. 20 oo doorashada aynu ku galnay oo

ahaa one time use, ma kiibaa mise mid kale, Xeerkaa waxbaa ka horeeya oo ah Gobolada iyo Degmooyinka isbixiya ayaa loo aqoonsanayaa goob Cod laga bixin karo oo leh Sharci, meel aan isbixin Karin baa la siinayaa Degmo hadaanay A,B ama C ahayn Degmo lama siin karo.

Xeerkan Guurtida madaxweynuhu wuxuu degreeto ku soo saaray in Guurtidu noqoneyso Xulasho, Halkan doorasho ku qoran ma inaga iyo Madaxweynaha baa is khilaafay, halkan Madaxweynaha ku qoran, Markaa tee ayaa la raacayaa ma madaxweynihii baa wixiisii ka kac yidhi mise waa khalad mabdiciyan ah.

Xeerkan Ganacsiga Baanka, Ma Baan kaliyaa mise waa Baanan kala duwan, waa inaan iska hubinaa waxa la inoo qeybinayo.

Xeerkan Hay'ada dib u habeynta shuruucda, Waa maxay hay'ada ka sareysa saddexdii dhardhaar ee Dastuuriga ah ma hay'ada afraadbaa taasina waa baadil waa in laga saaro.

Waxaan ku darayaa in loo yeedho Wasiirka Arrimaha Gudaha oo ajendaha lagu sood daro, waayo cardkii sharciga ah anagoo tusney ayaa nala yidhi ma dhaqaaqeysaan, dadku karaamada kama soo hadho, markaa taas waxaan leeyahay ha loo yeedho si wax looga weydiiyo.

Shuruucda golaha ka baxda waxaan soo jeedinaya in qofkasta oo xil dhibaana uu ka haysto koobi si loo ogaado wixii iska badala hadba.

Xeerka booliska ana waa la nagu canaantay anagu waxaanu nidhi ha la hagaajiyo, Markaa Xeerkaa cid hagaajisa iyo Sharciyaqaanadii ha loo dhiibo, yaan lagu celin kuwii hore u keenay.

12. **Md. Saleebaan Cawad Cali (Bukhaari):-** ugu horeyn waxaan anigu soo jeedinayaa:-
    - Sida mudanayaal badani ka hadleen Goluhu waa in uu noqdaa waxa ugu horeeya ee laga hadlo oo loogu horeysiiyo arrinta Golaheena haday tahay Gudiyo, Shirgudoon iyo haday Golaheena oo dhan.
    - Xeerka doorashooyinka, Doorashooyinka Madaxtooyada, Golaha Guurtida iyo Wakiialda dhamaan doorashooyinka oo dhan waxaa ka

horeeya laba qodob oo aad u mihiima oo kala ah Diiwaangalinta iyo kala-xadeynta Gobolada iyo degmooyinka la'aantoodna waxba lama qaban karo hadaan meel laga dhigin.

- Xeerka caasimada, Horta Caasimada nina marti kuma ah waa Caasimadii Somaliland Markaa waxaan leeyahay Xeerka Caasimada ilaa kalaxadayntii Gobolada iyo Degmooyinka la helo ayaa loo baahanayaa, markaa waa inaad tidhaahdaan Kala-xadeynta ha la da-dajiyo.

- Xeerka Hay'ada Dib-uhabeynta Shuruucda waa in laga saaro meesha kuma jiro loomana baahna hay'adaas.

- Xeerka doorashooyinka golaha wakiilada waa in la soo dadajiyo shir gudoonkuna xaq umalahan in uu hayo ee haloo dhiibo gudida ku shaqada leh.
- Xeerka guurtida Madaxweynaha ka hadlay, Xulis iyo Doorasho ha la isasoo waafajiyo oo isna dib haloogu noqdo.
- Xeerka Booliiska waxaan ku raacsanahay Md. Dable in dad aqoon u leh loo diro, Waliba Xeerkan waa la celiyay waa in wakhti la siiyo lagu soo hagaajiyo.

**Gudoomiyaha:-** Xeerka Booliiska Goluhu muu diidine wuxuu soo jeediyay in akhris 3aad laga sameeyo.

**13. Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijaandhe):-** horta shirgudoonka iyo Golaha waan salaamayaa:- Runtii sidii ragii iga horeeyay sheegen anigu inbadana waan ka hadlay Ajendaha golaha sameyntiisa laga qeybgaliyo, in sida Xeerarka iyo sida Goluhu u shaqeeyona in laga hadlo waan taageersanahay waana soo jeedinayaa oo waliba loogu horeysiiyo.

Xeerka booliskana aad buu u mihiim u yahay ha loo indho badsado oo dad khabiira ha loo dhiibo, runtii galdalooloyin badan baa ku jira markaa si wanaag san halooga baaraandago.

Xeerka Hay'adda dib-u eegista shuruucda isna halaga saaro waayo waxaynu arkaynaa hay'adii Maamul wanaaga oo dawlada kharash uun ku hayso waliba hay'adaa Maamul wanaagana aynu baabi'ino.

Xeerka doorashooyinka, doorashooyinka baaqanaya in wax laga qabto waa muhiim, Gudoomiye ha la sameeyo wax alaale iyo wixii lagu sameyn karo angiu waan ka soo horjeedaa kordhintaa.

**14. Md. Xamse Maxamed Gaadaweyne:-** Gudoomiye hadalka intii badnayd waa la yidhi, hadaad u fiirsato ajendayaasha Golaha waxaad moodaa inay isku midyihiin, waa xeer sii socda iyo mid fadhiya, markaa waxaan odhan lahaa aynu ka dhigno ajendaha mid interested ah.

Ajandaha waxaan ku soo darilahaa aan marna laga maarmeyn in Ascaatan kor u sii kacaysa mar walba iska waydiino wax oo ayna ajendaheena marna ka maqnaanin, mida kale ee aan rabaa in aan ka hadlo waa Tahriibta oo dhalin yaro badan galaafatay.

Waxaa kale oo aan soo dhaweynayaa xildhibaanadii ka hadlay in aan Golaha dhexdeena wax ka qabano aan si deganaani ay ku jirto aan u wada hadalno waxna aan u wada saxno, waxaan jeclahay si dhakhso leh Goleheena sixitaan aynu isugu sameyno

**15. Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** anigu marka hore waxay ila tahay intii badneyd ajendaha waa laga dooday qodobo ayaan ku daryaa:-

- Arinta golaha waa in aan ugu horaysiino, dee nidaam dawladeen baynu qeyb ka nahay karaameynu leenahay Mudane iyo shir-gudoon ahaan, tusaale ahaan maalintii dhoweyd waa la celiyay Mudanaanan ahay baan idhi, Waxaa I dhaafay Agaasimayaal iyo Wasiiro aan la lahadal, anigu inaan ka sareeyo ayaan u haystaa, waa sida arrintaan u jeedaa.
- Waxaa kale oo ah in mihiimada la siiyo xeerka baadhista shidaalka waa in aan ugu horaysiino oo hadii la helo wax meel inooga yaalaan, waayo iminka baadhitaan baa socda oo shidaal baa la baadhayaa, markaa hadii cawa la sheego oo la helo aynu sharci uga sameysano, oo waa in xeer inooga yaalo.
- Waxaa kale oo aan ku soo darilahaa Xeerka Doora-joojinka, darajooyin baa la bixiyay oo xukuumadu bixisay, markaa taasna aynu xeer ka soo saarno aynu ka yeelano sida loo bixinayo iyo sida loo dalacayo oo waa inay Xeer noqotaa oo Xukuumadu Xeer ka soo Gudbisaa.

- Arrinta Doorashooyinka, arrin ra'yi kalaan qabaa Xeer ha loo sameeyo, laakiin doorashooyinkii aynu soo marney dhibaatadii ka dhalatey, waa inaynu ka faa'ideysanaa wixii aynu soo marney, markaa siyaasada doorashooyinku waxay u baahantahay talo-badan ka yeelano, tusaale ahaan diiwaangalinta arrintu waxaan ahaa dadkii ka soo horjeeday, markaa khaladaadka dhacaya waxa weeye inaynu dhibaatoyinkii dhacay aynu dib u eegnaa, Markaa Xeerka Sameynaa, sidoo kale waa inaan is weydiinaa imisa doorasho ayanu qabana, oo markiiba termkii wadanka 2 doorashaa ka dhacaye oo kale nidhaahnaa.
- Qodobka u yeedhista Masuuliyiinta isna Mudnaanta Kowaad baan siinayaa, Goluhu waxbadan buu ka dhacsanayahay in loo iftiimiyo.

**16. Md. C/raxmaan Muuse Jaamac:-** Marka hore dhamaan waad salaamantihiin, Laba arrimood ee Qiimeynta Golaha iyo Xukuumadaba waan soo dhoweynayaa oo ku raacsanahay.

**Waxaan ka saarayaa:-**

- Xeerka booliiska ee Qodobka 1aad laga dhigay maalin dhoweyd baa la diiday inuu mudo dib loo dhigo ayay ahayd,
- Xeerarka Qareenada iyo Maamuuskana iyana waan soo dhoweynaya.
- Xeerka shidaalka, waxaa ka horeeya in la keeno Golaha Heshiiyadii shidaalka ee Xukuumadu gashay, maxaa xeer la sameeyaa heshiiba lama keenine.
- Xeerka Wada-marista anigu ma garanayo ileyn wadooyinku wey jireen markii hore ma xeer baanan lahayn isna ha laga saaro,
- Xeerka Komishanka Dib-u eegista isna waan ka saarayaa.
- Xeerka Caasimada waxaa ka horeeya Kala-xadeyntii Gobolada iyo degmooyinka marka la sameeyo kala-xadeynta ayaa la sameyn kara isna.

- Xeerka Doorashoyinka Golaha Wakiilada Qabyo qoraala isna shir-gudoonku inuu keen xaq uma laha, sababta meesha loogu soo qoreyna garanmaayo.
- Miisaniyada oo aan ina soo gaadhin in ajendaha lagu soo daro waa khalad isna waan ka saarayaa.
- Xeerka Doorashada Golaha Guurtida oo Madaxweynuhu hayo golahana soo gaadhin, isna waa in laga saaro.

**Waxaan ku soo darayaa Ajendaha:-**

- Xeerka Miisaaniyada waa in lagu daraa Ajendaha
- Xeerka Doorashooyinka isna waa in lagu soo daraa.
- Xisaab xidhkii Miisaaniyada dhamaatey ee in bisha 6aad la keeno ahayd waa in lagu soo daraa ajendaha.
- Kala-xadeynta Gobolada iyo Degmooyinka.

**17. Md. Maxamuud Axmed Obsiiye:- waxaan ka dhigayaa Ajendaha in lagu soo kordhiyo.**

Arrimaha Golaha in la wada hadlo oo wax la isla saxnaa.

Heshiiyadii dawladu gashay waa in Golaha la horkeenaa.

Hay'adda aan la ansixin ee sharcigoodii Goluhu ansixin waa in ajendaha lagu soo daro.

Xisaab xidhadii Miisaaniyadihii la ansixiyay iyana waa in Ajendaha lagu daraa.

**18. Md. Siciid Warsame Ismaciil:-** intii badnayd waa laga hadlay Ajendaha doodiisa anigu waxaan odhan lahaa:**-**

- Xeerka Booliiska ha laga saaro waayo wuu soo degdegay oo maalin dhoweyd baynu diidnay.
- Xeerarka Madaxweynaha ka soo noqdey iyagu waa caadi

- Qiimeynta Xaalada Guud ee dalka iyana waa muhiim waan taageersanahay in lagu soo daro.
- Xeerka Derajada Ciidmada Asluubta iyo Militeryga iyana waa in la keenaa.
- Xeerka Kala-xadeynta Xuduudaha Gobolada iyo Degmooyinka dalka
- Xafidaada shuruucda iyo dabagalkooda

| Cawad Cali Maxamed | C/risaaq Siciid Ayaanle |
|---|---|
| Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada | Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI |
| ------------------------------------------------ | ----------------------------------------- |